Hoggaami Ubadkaaga



Q:Naciima Yuusuf Xuseen.

"UBADKU WAA XAASHI CAD OO DIYAAR U AH IN LAGU QORO TARBIYAD , WAA MUSTAQBAL SUGAYA IN AYNU SIDA UGU WANAAGSAN U TAABBO GELINO"

"Waa in aynu qirno in aynu nahay qaabeeyeyaasha timaadada oo aynu soo saarno ubad lagu hirto"



Naciima Yuusuf Xuseen

" Dhakhtarad wax ka baratay caafimaadka dadweynaha , kalkaaliso iyo qoraa qalinka ku xusta danta dalka iyo dadka"

Tusmo :

Afeef: IV
Hibeyn: IV
Mahad-naq: IV
Hordhac: V

Cutubka 1aad: Tarbiyadda iyo Marxaladaha kala duwan : 1

Cutubka 2aad: Ku hoggaami hanaan hufan: 10

Cutubka 3aad: Duni baa aad rejo u tahay : 24

Yusuf

Afeef

- Ma gafe waa Alle SWT, wixii aan asiibo waa Mahad Alle wixii aan gafana aniga iyo shaydaan baa ay ka ahaatay.

Hibeyn

- Waxa aan buuggan u hibeeyay inta samaha jecel ee diyaar u ah in ubadkooda ay taariikhdu xusto.
- Waxa aan u hibeeyay **Hooyo Samsam Ahmed C.llaahi , Hooyo Shukri Iimaan Muxumed, Hooyo Caasha Cabdi Carwo ,Habo Shukri Axmed C.llaahi .**

Mahadnaq

- Mahad aan duugoobeyn waxa ay u sugnaatay Rabbi SWT, amaan iyo nabad gelyo nebi Muxammed korkiisa ha ahaato.
- Waxa aan u Mahad naqayaa dadkii sabab unoqdey Alle SWT, idamkiisa ahaanshaha qofka maanta aan ahay:
  - Waalid, ehel, asxaab, barayaashii xusuusta mudnaa, iyo qof wal oo saameyn la mahadiyo ku yeeshay hayaanka nolosha.

Mahadnaq gaar ah:

Maxamed Mahdi Huseen.
Ahmed Mahdi Huseen.
Cali Mahdi Huseen.
Maxamed Yuusuf Huseen.
Mahad Yuusuf Huseen.
Hodan Yuusuf Huseen.
Hoodo Yuusuf Huseen.
Khadra Yuusuf Huseen.
Mubarak Yuusuf Huseen.
Rooda Huseen Cabdi.
C/casiis Mustafe Axmed.
C/fataax Carab Cabdi.
Farxaan Ismaaciil Askar.

Hordhac:
Mahad aan lasoo koobayn waxa ay u sugnaatey Rabbi SWT, nabad gelyo iyo amaani nebi Muxammed korkiisa ha ahaato.

Wakhtiga aad noqoto waalid ama aad u diyaar garoobayso in aad noqoto keliya masuuliyaddu ma aha in aad ku biirtay bahda waalidka oo aad qaadatay magacaa Hooyo/Aabbe, masuuliyadu intaa aad bay uga durugsantahay, maxaa yeelay waxa aad masuul ka tahay qof dhan noloshiisa, hab-dhaqankiisa, qofka uu noqon doono, taariikhdiisa, garashada iyo soo saaritaanka hibadiisa uu gaarka la yahay, iyo saamaynta uu dunida ku yeelan doono intaba. Waxa kale oo aad masuul ka tahay in aad barto siyaabaha lagu badbaado si looga gudbo badweynta duruufaha nolosha ee kala duwan.

Waxa gacantaada ku jira makhluuq karaamo leh oo kaa sugaya in aad ku hanuuniso jidka toosan ee loo maro nolol hufan oo lagu hirto.

Ogsoonow masuuliyadanu ma aha mid weji qudha leh oo tallaabooyin kooban ku eeg, laakiin waa ay wejiyo badan tahay, maadaama uu qofku marayo marxalado kala duwan oo mid walba u baahantahay siyaasadeeda loo raacayo ee sida ugu wanaagsan looga gudbayo.

Mustaqbalka ilmaha waxa go'aamiya waalidka, taasina waa xaqiiq laba ku murmaynin, si aynu taa u cadeyno halyey kasta oo taariikhdu xusto waxa uu ka waramaa dedaalka iyo halganka ay u mareen waalidku si uu u noqdo qofka uu yahay. Waxa kale oo isna ku jira kaalinta waalidka qof kasta oo koriyey ubad.

Waxa mudan in la xuso oo la is weydiiyo Hooyo/Aabbe keebaa raad weyn ku leh ubadka? Hablaha yaa hogaamin kara Hooyo/Aabbe? Wiilasha yaa hogaaminkara Hooyo/Aabbe?

Sida caadiga ah wiilku waxa uu ka dhaxlaa aabihii awoodda iyo kartida, halka uu hooyadiina ka dhaxlo naxariis iyo dabacsanaan, sidaana waxa ku dhisma tilmaamihiisa guud.
Inantu waxa ay hooyadeed ka dhaxashaa hanaanka dumarnimo iyo dabacsanaanta halka uu aabbeheedna uu yahay tiir iyo awood ay nabadgelyo ku dareento.

Hadaba, xaaladani waa goorta ay qoysku wada noolyihiin, Haddii aanay lawada noolayn waxa uu qofku ku raadoobayaa hadba labadooda kii uu la nool yahay ama cidda kale ee masuul ka ah.

Labada waalid hoggaan fiican ayaa ay u noqon karaan ubadkooda (wiilal/gabdho), waxa kale duwan masuuliyadaha ka saaran, laakiin waalidku dedaalka uu geliyo iyo xilka uu iska saaro hoggaamintooda saameyn le'eg ayaa ay yeelanayaan.

Waxa iyana xusid mudan in aynu ogaano in tiro kooban oo dadka ka mid ahi ay ka fikiraan sidii ay ubadkooda uga dhigi lahaayeen kuwo karti leh, hanan kara hoggaaminta umadooda isla markaa saamayn weyn yeelan kara. Taasi waxa ay keentay in ay soo baxaan bulsho intooda badani aanay xil iska saarin guud ahaan danta umadooda, gaar ahaan xilka ka saaran inta ku xeeran, hogaanku ma aha mid dal maamula oo keliya, se waa qofkasta oo u adeega baahiyaha bulshada oo ka bilaabmaysa goobta uu ku nool yahay iyo inta ku xeeran. Haddii aynu helno bulsho hab-fikirkeedu sida tan yahay, waxa aynu noqon karnaa qaran lagu hirto.
Run ahaantii dhammaanteen waxa aynu wada nahay mas'uul hooyo, aabbe, macallin, madaxweyne, IWM. Sidaa darteed

waxa aynu qabanaynaa hawlo aynu midhahooda guranayno is la markaana la inaga xisaabinayo.

Waxa muhiim ah in aynu ogaano in marka uu qofku qirsan yahay meeqaamkiisa iyo waajibka sugaya uu siwacan ugasoo baxayo isla markaa midho wanaagsanna ka guranayo.

Allah SWT ayaa Mahad leh oo dalkeenna waa ay ka buuxaan dadyow badan oo horumarka ka shaqeeya, laakiin waxa uu qoraalkanu ku socdaa bilawga nolosha iyo hayaanka lagu soo saaro halyey yo lagu hirto.

Haddaba sida loola dhaqmo Dhammaan marxaladaha kala duwan ee ay ubadku maraan, tilmaamaha lagu beero iyo masuuliyadaha lagu kalifo ayaa ku xusan buuggan la magac baxay **"Hoggaami ubadkaaga"** ee akhris wacan.

Ku saabsan buugga iyo qoraaga :

"Naciima Yuusuf Xuseen, waa dhakhtarad wax ka baratay caafimaadka dadweynaha, kalkaaliso iyo qoraa qalinka ku xusta danta dalka iyo dadka"

Waxa la shaaciyay buuggan ,2021.

CUTUBKA 1AAD:
TARBIYADDA IYO MARXALADAHA KALA DUWAN.

- **Waa maxay tarbiyaddu?**

1.1.Hordhac:

Marxaladaha kala duwan ee tarbiyaddu waa jidka loo maro dadnimo dhamaystiran.

Waalidku waxa ay ka gudbaan caqabado badan oo ay ku helaan khibrad iyo caadifad isku xidha iyaga iyo ubadkooda. Hoos waxa ku xusan xog ku saabsan arintaas.

Tarbiyaddu waa falalka iyo nidaamka ay raacaan waalidku si ay ubadkooda ugu diyaariyaan nolol madax banaan iyaga oo baraya qaabka loola dhaqmo dadka kale isla markaa loo raaco xeererka uyaala bulshada ay ka tirsan yihiin.

Tarbiyadda ubadka waxa saameeya dhaqanka ka jira deegaan kooda, tilmaamaha waalidka, diintooda iyo u diyaar garowga ay raalli ka yihiin in ilmahoodu uu yahay qof nool oo ubaahan u dhibrin iyo tilmaam. Waxa kale oo saameeya ogaanshaha dariiqa saxda ah ee ay ku taageeri karaan ,si uu u koro una horumaro wakhtiga caruurnimo iyo qaan-gaadhka intaba. Waxa kale oo saameeya habfikirka ay waalidku ula tacaamulaan qadiyadaha kala duwan sida doorashada habka ugu saxsan ee loo edbiyo ubadka.

1.2.Qeexid

Tarbiyaddu waa: hawlgalka korinta ilmaha laga bilaabo aminta uu dhasho ilaa uu ka gaadhayo qaangaadhka.

Waa hubaal in uur-kujir kuba ubaahan yahay tarbiyad oo ay culimadu xaqiijisay in ilmaha uurka kujiraa baran karo lana qabsan karo codadka la dhagaysiiyo, isla markaa nidaamka cunto ee ay raacdo hooyadu ayaa saamayn weyn ku leh samaysanka jidhkiisa, maskaxdiisa, iyo caafimaadkiisaba, oo ah saamayn soo baxda xiliyada dambe ee nolosha.

Haddaba, xogta ku xusan buuggani waxa ay la jaanqaadaysaa qeexitaanka kor ku xusan.

1.3. Noocyada tarbiyeynta ubadka

Waxa ay culimadu uqaybiyeen afar nooc oo kala ah:

1. Tarbiyadda adag

Waalidka raaca nidaamkan waa kuwo go'aan adag oo adeegsada edbin adag.

- **Tilmaamahooda**
  - ❖ Waxa ay badiyaan Isticmaalka ciqaabta, waxa ku yar isticmaalka wada hadalka.
  - ❖ Waxa ay bixiyaan amar aanu sharax la socon.
  - ❖ Waxa lagu tilmaamaa kuwo daryeelkoodu yar yahay.
  - ❖ Habla dhaqanka dabacsan ayaa ku yar, waxa ay ubadka ka fishaan in ay ka helaan waxtar weyn.

2. Tarbiyadda fudud

Waalidkani waxa ay u ogolaadaan ubadka in wixii ay doonaan sameeyaan, talada ay bixiyaan waa ay kooban tahay.

- **Tilmaamahooda**
  - ❖ Waxa ay ka dheeraadaan nidaamka adag, waxa ay dejiyaan xeerar kooban, mararka qaar waxa ay u ogolaadaan ubadka inay ogaadaan caqabadaha hortaagan laf ahaantood.
  - ❖ Xidhiidh laba dhinac ah ayaa ka dhexeeya ubadkooda.
  - ❖ Waa kuwo daryeela ubadkooda.
  - ❖ Waxba kama fishaan in ubadkoodu la yimaadaan.

3. Tarbiyad aan wadaag lahayn

Waalidkani waxa ay ubadka siiyaan xoriyad buuxda, laga yaabaa in qaarkood soo dhexgalaan go'aaminta tallaabooyinka muhiimka ah ee ubadkooda, halka kuwo kale aanay khibrad u lahayn habka loo koriyaba, sida darteed masoo galaan go'aamada iyo doorashada ubadkooda.

- **Tilmaamahooda**

❖ Ma raacaan nidaam cayiman oo ay ku hagaajiyaan dhaqanka ubadka.
❖ Xidhiidhkoodu aadbuu uyaryahay.
❖ Daryeelkoodu waa uu yar yahay.
❖ Filashadoodu waa ay koobantahay.

4. Tarbiyad rasmi ah/ lagu kalsoon yahay.

Waalidkani waxa ay leeyihiin habfikir toosan, waxa ay sifiican u daryeelaan ubdkooda, sida darteed waxa ay ku soocan yihiin ubadkoodu toosnaan nafeed, awood fikir iyo ku tiirsanaan nafeed. Waxa lagu tiriyaa habka ugu wanaagsan.

- **Tilmaamahooda :**

❖ Waxa ay dejiyaan xeerar cad-cad oo ay ku edbiyaan ubadkooda, iyaga oo cadeeya sababta loo dhigay iyo Ujeedada laga leeyahay xeerarka.
❖ Xidhiidhka ay la leeyihiin ubadkoodu waa wareegto, isla markaa waxa uu udhacaa hab ku munaasib ah fahamka iyo garashada ilmaha.
❖ Daryeel fiican ayaa ay ugudaan ubadkooda.
❖ Waxa ay ka filaan ubadka filasho iyo ujeedo weyn oo laakiin loo dejiyay qaab sax ah, oo ay la iman karaan.

1.4.Marxaladaha tarbiyadda

Hordhac:
Laga bilaabo naas-nuujinta ilaa qaan-gaadhka ilmuhu waxa uu maraa marxalado korriin oo xaddidan oo lagu magacaabo joogtada cimriga .

Dadka waxa ku yimaada marxalad kasta isbedello fikir/garasho, jidheed, nafeed/luuqadeed, iyo caadifad intaba.

Culimadu waa ay isku khilaafeen kala qeybinta marxaladaha korriinka ilmaha. “1936 kii” “Jan Piaget” oo ah aqoon yahan cilmi nafsi ah oo “Switzerland “ u dhashay, waxa uu dejiyay aragti uu 4 ugu qaybiyay marxaladahan:

1. Dhalasho ilaa 18-24 bilood.
2. 2 sano ilaa 4 sano.
3. 7 sano ilaa 12 sano.
4. 13 sano ilaa qaan-gaadh.

Culimo kale ayaa waxa ay u qeybiyeen 6 marxaladood oo kala ah: ubadka kujira waqtiyadan hoos ku xusan;

1. Dhashay .
2. Naas-nuug.
3. Socodka ka hor.
4. Dugsiga ka hor.
5. Xiliga waxbarashada .
6. Qaan-gaadh .

1. Tarbiyadda ilmaha dhashay

Waa marxalada ugu horreysa ee ilmuhu jidhkiisa iyo caqligiisaba kula qabsanayo caalamkan dibadda laga bilaabo aminta uu dhasho ilaa bisha 2aad.

Waxa ay leeyihiin ubadku oohin badan laga bilaabo bisha 6aad ilaa 8aad oo dib udegta wiiga 12aad ilaa 16aad.
Waxa samaysma waqtigan xidhiidhka hooyada iyo ilmaha oo waxa uu kasoocayaa muuqeeda iyo codkeeda kuwa dadka kale, markaa wuu dhoolla caddeeyaa.

Waxa uu nabad gelyo ku dareemaa gacmaha waalidkii oo qaada, eega, oo hadal degen kula hadla.
Ilmaha oo marka uu ooyo lala falgalo oo loo salaaxo madaxa, waa ay dejisaa, waxa ayna xoojisaa xidhiidhka ka dhexeeya waalidka.

Waxa lagula hadlaa cod la mid ah ka uu ku hadlayo, si ay awooddiisa hadalku u xoogaysato, waxa loo dhiibaa waxyaabo kala duwan oo kala midab ah si uu ula qabsado oo uu u kala garto, laakiin waa laga fogeeya goobta la seexiyo.

Caloosha oo loo jiifiyo maalin walba dhawr daqiiqo, waxa ay xoojisaa muruqyada luqunta iyo madaxa iyo qaybta sare ee jidhka, waxa ay u fududeysaa guurguuradka iyo istaagaba xilliga dambe.

Marka uu seexdo waa in uu dhabarka ufidsan yahay.

2. Tarbiyadda ilmaha (3-12 bilood)

Marxaladan waxa uu ilmuhu kula xidhiidhaa uu eego oo dhoola caddeeyo oo ku dhego, taasoo uu kusoo bandhigo baahiyiisa.
Waxa uu fahmayaa caalamkan ku xeeran iyo adeegsiga xubninihiisa.
Waxa uu la socdaa falcelinta waalidkii, iyo cabbiraadda wejigooda, iyo sida ay uhadlayaan. In lala ciyaaro oo muhiimad la dareensiiyo waxa ay siisaa degenaan iyo nabad gelyo.
Si loo horumariyo awoodihiisa waa in loo yeelo in uu ku dhaqaaqo meel kufilan oo aamin ah, waxa la dhiiri geliyaa in loo qaado goobo quruxbadan sida beeraha oo kale.

Xilligan waxa muhiim ah in aad siiso waqti uu aamino naftiisa oo uu iskii wax usoo qabsado adiga oo caaawinaya.
Waqti cayiman oo cuntada lasiiyo waxa ay dareensiisaa farxad/nidaam, agab kala duwan oo lagu ciyaarsiiyo laguna dhawaaqo magacyadooda waxa uu ku baranayaa Magacyada kala duwan.

3. Tarbiyadda ilmaha socodka ku cusub (1-3 sano)

Marxaladan waxa lagu tiriyaa mid ay ka buuxaan tijaabooyin badani marka loo eego waalidka, maxaaa yeelay waa waqti ay geeyaan cisbitaalka oo la xidhiidhaan dhakhaatiir kala duwan, sida dhakhtarka ilkaha, waxa uu yeeshaa ilmuhu cadho badan, dabadeeto waxa ay baraan sida uu uga gudbo waxa uu ka baqanayo/dhibaya oo dhan.

Waxa uu ku dhawaaqi karaa weedhaha la baro ee ka kooban xuruufta, waxa kale oo uu dhugan karaa micnaha erayada quseeya xaddiyada waaweyn/yaryar sida weyn/yar, sida oo kale waa waqti uu aad u su'aalo badan yahay, oo uu ku deydo codadka iyo dhaqdhaqaaqa xayawaanka.
Waxa kale oo ay jecelyihiin socodka goobaha quruxda badan.

Wakhtigan waa in ay waalidku wax u akhriyaan ilmaha, la ciyaaraan, oo ay ku dhiiri geliyaan in uu waxa uu doonayo usheego si sax ah.

4. Tarbiyadda ilmaha (3-5 sano)

Marxaladan waxa uu ilmuhu leeyahay awood uu ku xakameeyo naftiisa iyo caadifadiisa ,waxa samaysma qaybo shakhsiyaddiisa ka mid ah oo madax banaan, oo waxa yaraanaysa ku tiirsanaantii badnayd ee waalidka uu talaabo kasta ubaahnaa, waxa koreysa awoodiisa xidhiidhka dadyowga kala duwan,waxa uu baahi weyn uqabaa tilmaan iyo hanuunin hab wanaagsan ku socota waa in ay waalidku muhiimad siiyaan xidhiidhka ilmaha oo ay marwalba garab joogaan oo ay tilmaamaan, xidhiidhka xilligan uu ilmuhu la leeyahay, waalidkii waxa uu dejiyaa nooca xidhiidhka ee uu la yeelan doono marxaladaha dambe.

Si haddaba loo caawiyo in ilmuhu wax barto, waa in arimahan si fudud loogu soo dhaweeyo oo lagu celceliyo xeerar sahlan si uu ubarto.
Xilligan amaanta falka fiican ee uu la yimaado waa muhiim, Maadaama oo ilmuhu u arko waalidkii tusaalaha uu ku deydo, waa in ay u noqdaan tusaale wanaagsan,sida oo kale in lagu dhiiri geliyo in uu la ciyaaro caruurta kale waxa ay xoojineysaa fahamka wadaagga iyo saaxiibtinimada,sida oo kale waa in la wanaajiyo hadalkiisa oo lagula hadlo weedho dhamaystiran.

5. Tarbiyadda ilmaha (6-12 sano)

Waxa laga yaabaa in la moodo in uu xilligan ilmuhu koray oo gaadhay horumar ku filan, laakiin weli awoodihiisa badh ka mid ahi waxa ay ubaahan yihiin in la horumariyo.
Waxa uu ubaahan yahay in uu fahmo xidhiidhka saaxiibtinimo, sida loogu kalsoonaado dadka kale, iyo xalinta mushkiladaha.

Waxa kale oo u baahan yahay sida ugu wanaagsan ee uu u dalbi karo caawin, hadal u wadaagi karo ,isla markaa koox ula shaqayn karo. Malaha khibrad uu ku xadido yoolkiisa, sidaa darteed waa in marwalba la xasuusiyo masuuliyada uu leeyahay sida oo kale waxa ku adag in uu ogaado awoodaha iyo liidashada uu leeyahay intaba, sidaa darteed waa in laga caawiyo in uu galo tijaabooyin uu ka baqo, laakiin uu awood uleeyahay,sida isku dayga ciyaaraha kala duwan.

Waxa ay waalidku karaan in ay la yeeshaan ubadka xidhiidh adag oo ku dhismaya in ilamaha lala wadaago noloshiisa iyo wax qabadkiisa. Ku dar waa in dhanka saxda ah si wanaagsan loogu tilmaamo, oo la qiimeeyo dhaqankiisa.
Waa in loo ogolaado in uu cabiro dareenkiisa oo lasiiyo kalsooni uu ku dhiirado waxqabadkiisa uu jecelyahay, isla markaa la amaano.

6. Tarbiyada ilmaha (15-18 sano)

Marxaladan waxa lagu tilmaamaa mid cadayneysa sida uu ilmuhu diyaar ugu yahay in uu waajaho nolosha kedib dugsiga sare, waa uu madax banaan yahay marka laga eego meelo badan, laakiin weli meelo kale ayaa u baahan in la horumariyo.

Marka la eego koritaanka waxa ku yimaada is bedello badan oo jidheed, haddaba waxa uu ubaahan yahay taageerada iyo joogitaanka waalidka wakhtigan. Waxa lagu xaqiijiyay diraasadaha in laga yeelo jawi qoys oo ay ka buuxdo ididiilo,

iyo xidhiidh joogto ahi, isla markaa ka qayb qaadashada waxqabadyada qoyska iyo bulshaduba ay ka caawiso ilmaha in uu sifiican uga gudbo marxalada tan.

Waxa ku waajib ah waalidka marxaladan in ay ku caawiyaan dhismaha shakhsiyaddiisa madax banaan iyo in uu garto in kala duwanaanta aragtidoodu ay tahay arin caadi ah.
Waa in la dhawro waxyaabaha u gaarka ah, isla markaa loo dejiyo xuduud aanu dhaafi Karin,waa in lagu taageero, qorsheynta mustaqbalkiisa oo talooyin lasiiyo, uu kaga dheeraado wixii caafimaadkiisa wax yeelaya sida maan-dooriyeyaal,sida oo kale waa in lagu taageero waajihitaanka caqabadaha oo lagala doodo sida uu u maarayn karo cadhadiisa iyo welwelkiisa.

Tix: mawdoo3.com -تربية الاطفال

CUTUBKA 2AAD:
KU HOGGAAMI HANAAN HUFAN

2.1.Hordhac:

Kadib markii aynu kasoo hadalnay tarbiyadda noocyadeeda iyo marxaladaheeda kal duwan, waxa aynu cutubkan ku lafa guri doonaa dhamaan talaabooyinka dhaxal galka ah ee ay waajibka tahay in lagu daro oo ay la socdaan dhamaan heerarka nolosha ee kala duwan. Taa minaheedu waxa weeye tallaabo walba waxa ay leedahay wakhti ku haboon oo ay tahay in lagu daro nolosha ubadka aad doonayso in ay noqdaan kuwo lagu hirto.

Noloshu waa geed oo kale, geedku waxa uu leeyahay xidido, jirrid, laamo ka farcamay , caleemo iyo midho, sida uu geedkuba faracyo badan u leeyahay ayaa ay noloshuna u laamo badan tahay, taasina waxa ay ina baraysaa in aynaan ufahmin in ay tahay shay sahlan oo kooban, laakiin ay tahay micne aad uweyn oo u baahan fahan balaadhan iyo isu miisaamid. Hadaba, hoos waxa ku xusan laamaha iyo waajibka nolosha ee ay tahay in aynu fiiro gaar ah u yeelanno.

2.2.Tacliin (dedaal iyo halgan joogto ah)

Diin :

Diin micnaheedu waxa weeye hab loo noolaado, Islaamnimo na waa habka ugu wanaagsan ee loo noolaando, hadaba diinteenna iyo barashadeedu waxa ay inagu hanuunineysaa in aynu si wanaagsan ula xidhiidhno Alle SWT, sida oo kale ogaano waxa uu ina faray iyo waxa uu inaga reebay. Waalidku waaka farriintan sida ee gudanaya waajibka ah in uu ilmaha baro Alle SWT abuuray caalamkan iyo waxa ku noolba. Sidaa waxa uu ibnu aadamku ku helayaa jiheeye haga noloshiisa, sabab uu ku noolaado iyo dareen ah in uu ka tirsan yahay adoomada Alle SWT.

Haddaba diinta barashadeedu waa baahi aan laga maarmi Karin oo la soconaysa marxaladaha nolosha oo dhan maadaama ay aad u balaadhan tahay.
Barasho kasta waxa fure u ah, luuqad, barashada diinta, islaamkana waxa fure u ah luuqadda carabiga oo ah hawiyadeena 1aad maadaama ay tahay luuqadda Qur'aanka kariimka ah iyo diintuba ay ku qoran yihiin. Sida aynu ognahay barashada diintu waa xidhiidhka ka dhexeeya addoonka iyo Rabbigii SWT, sidaa darteed ku hanuuni ilmahaaga in uu la xidhiidho oo uu kaalmo weydiisto Alle SWT.

T. Cilmiga Maaddiga ah
Waa hubaal in cilmiga maaddigu uu yahay furaha nolosha aynu maanta joogno. Cidna ma dafiri karto dheefta laga helayo, haddii la barto oo la dhex galo. Cilmiga maadiga ahi waa ka lagu dhiso magaalooyin, waa ka lagula tacaalo cudurrada, waa ka lagu sameeyo hubka la isku difaaco ee lagu maareeyo dhaqaalaha.

Run ahaantii in laan ka mid ah laamihiisa lagu faro adeygo oo loogu adeego bulshada ayaa ka wanaagsan in lagu dawakho tijaabooyin badan oo laamihiisa la tijaabiyo. Taasi waa ta

keentay in dadyowgu ukala qeybsamaan baho badan oo kala duwan.
Waxa wakhti xaadirkan la ogyhayay in tiknoolajiyadu ay qaban doonto adeegyada dadku qaban jireen. Taasi waa caqabad, laakiin dhanka kale waxa loo baahan yahay dadkii ka shaqaysiin lahaa ee maarayn lahaa qalabkaa.
Ku taageer ubadkaaga inay badweynta maaddiga ka kalluumaystaan oo ay doortaan fiilka ay raali nafeed ku dareemayaan.

J. Afaf

Luuqaduhu waa isku xidhaha la isku fahmo ee la isku af garto.
Waa furaha barashada ee ah shardiga koowaad ee uu leeyahay shay la baranayaa, hadba inta aad ka taagan tahay luuqadda uu ku qoran yahay waxa aad baranayso ayaa aad ka fahmaysaa.

In aad taqaano luuqado badan waxa ay ka turjumeysaa hodantinimadaada aad kaga gudbi karto xuduudaha iyada oo wax caqabadi kaa hor imanayn. Maadaama ay dunida madaxda ku nooli ku hadlaan afaf kala duwan, turjumaanada dhexda u ah madaxda kala duwan waxa ay leeyihiin maamuus gaar ah iyo fursado shaqo oo aad u badan. Sidaa darteed waa in aynu ku darno qorshaha , maxaa yeelay awood ayuu uleeyahay ibnu aadanku in uu ku hadlo, saddex, afar, Shan iyo wax ka badan oo kala duwan.Casrigan , luuqadaha aad ayaa loo bartaa oo waxa fudud luuqado badan in la baran karo,sida oo kale waxa lagu tiriyaa luuqada shiinaha in ay tahay luuqada mustaqbalka ,maadama dalka shiinuhu uu yahay quwad soo muuqata.

2.3. Hibooyin (waa jidka lagu soo kordhiyo wax cusub)

Awoodaha u gaarka ah qofka ee ku aasan qalbigiisa waa kuwo haddii la ogaado, saamayn weyn ku yeesha nolosha qofka iyo

dadkiisa intaba. Marka uu ogaado qofku waxyaabaha naftiisu ay u janjeedho, laba jid midkood ayaa uu u mari karaa si uu uga midho dhaliyo. Hibooyinka qaar waxa ay ubaahan yihiin tababar kooban, halka kuwo kale ay ubaahan yihiin tobanaan sano si loogu tababarto ka faa'ideynta hibadaas. Qof waxa uu jecel yahay maamulka, ku kale qoraalka, ku kale dhex galka bulshada, ku kale hadalka, ku kale safarka, ku kale dabaasha iyo kalluumaysiga, ku kale fardo fuulka iyo tuurista warmaha, ku kale nabad gelyada iyo dhexdhexaadinta.

Waxa kale oo casrigan jira hibooyin ay kobciyaan dadka awoodda u leh sida aqoonta cunto karinta iyo farsamooyinka gacanta iyo sawirka dabiicadda. Hadaba waxa lagu ogaadaa awoodahan dahsoon wax qabadyada kala duwan ee uu si kediso ah ku ogaado qofku in ay tahay goobtanu goobtiisii. Waa ma huraan in waalidku la socdaan oo ay ubadka ka caawiyaan ogaanshaha iyo gaadhitaanka midho gurashada hibooyinkaas. Waa lama huraan in barashada tooska ah ay garab socoto tababarrada wax qabadyo daruuri u ah ilmaha.

2.4. Caawin

Waa tilmaan wanaagsan oo ay tahay waajib in aynu ku beerno ubadkeenna. Caawintu waa fal qalbi dabacsan oo jecel in arimuha qof walba si fudud ay ugu dhamaadaan.

Xadiisyada nebiga SCW, waxa ajarka if iyo aakhiro ba uu leeyahay qofka kaalmeeya ee usahla arimaha uu awoodo walaalkiis. Ma aha tilmaantani mid ku amraysa in aad qabato waxyaabo aadan awood u lahayn, laakiin waa in aanad ka gaabin wixii caawin ah ee aad karto.

Tilmaantan marka aad ku beerayso ilmaha waa in aad bilawdo wakhti hore iyo marka uu ilmuhu korayo, sida in aad barto in

uu caawiyo walaalkiisa ka yar, saaxiibkii, oo la soconaysa marxaladaha kala duwan.

Sidaa oo kale oo waa in aad ku guubaabiso caaawinta dadka waaweyn, kuwo masaakiinta ah iyo cid kasta oo jilicsan. Sida oo kale waa in aad barto in uu dareemi karo oo uu la falgeli karo baahida iyo dareenka dadka kale si uu unoqdo mid anfaca dadkiisa. Caawintu waxa ay suurto gelisaa in ay qabsoomaan hawlo waaweyn, maxaa yeelay waxa isku biiraya awoodo kala duwan.

2.5. Nabad gelyo iyo degenaan

Qofka ibnu aadan ka ahi waxa uu la fal galaa oo uu la dhaqmaa dadyaw kala jaad ah oo kala dabeecado duwan. Marnaba kama maarmo qofku in uu gooni uga noolaado dadka uu ka mid yahay,baahida uu u qabo la noolaanshaha dadku na waxa ay ubaahan tahay in uu maareeyo, xakameeyo oo uu sida ugu wanaagsan ula dhaqmo. Qaabka uu ula dhaqmo dadka kale iyo sida uu uga falceliyo waxyaabaha kaga imaada waxa ay ka turjumaan shakhsiyadiisa, waxa ay saameyn weyn ku yeeshaan caafimaaadkiisa sidaa darteed waa in uu fiiro gaar ah u yeesho hab-dhaqankiisa.

Laba tilmaamood oo ka mid ah kuwa ugu toosan ee lagu amaano, ibnu aadan ka waxa ka mid ah nabad gelyo iyo degenaan. Tilmaamahan dadka qaar si dabiiciya ayay u leeyihiin halka kuwo kale ay bartaan oo ay ka dhigtaan hub ay ku waajahaan nolosha. Nabadgelyadu waa in uu qofku u arko khilaafka mid la xalin karo oo waxa uu kala saaaraa qofka iyo khilaafka. Waa qofka oo aan dhibaato dooneyn in uu ugeysto qof kale laakiin wixii dhex yaal ku xalinaya wada xaajood, waa khilaaf nacayb ee ma aha dad nacayb, waayo waxa uu ogyahay goorta la xaliyo khilaafka in la isugu soo wada noqonayo dallada dadnimo . Qofka nabadgelyo ehel u ahi waa qof neceb

inuu dadka kale ku dhibaateeyo hadal ama fal. Tilmaantan in labaro ubadku waxa ay badbaadin kartaa dunida oo dhan.

Degenaantu, iyaduna waa tilmaan dadka qaarkood hibo u leeyihiin kuwo kalena halgan u galaan si ay uyeeshaan, halka kuwo kale aanay awood u lahayn inay kasbadaan. Run ahaantii waa tilmaan qiimo leh oo lagu xaliyo si wanaagsanna looga fikiro arimaha. Waxa ay ka caawisaa qofka in uu qaato go'aanka uu si wanaagsan uga fikiray,waxa la sheegay in qofka degeni waxa uu doonayo si wanaagsan uhelo, maxaa yeelay waxa uu leeyahay sabirka lagu sugo waxa la rajeynayo. Degenaantu waa adiga oo og waxa aad xaq uleedahay iyo dariiqa aad u marayso, isla markaana dareemaya raaxo nafeed oo aad ku daadihiso nolol maalmeedkaaga.

2.6. Doontitaan :

Doontitaanku waa awoodda kala saarta waxqabadka uu qofku qaban karo isla markaa raali ka yahay iyo lidkeeda. Ma jirto caqabad hor istaagi karta waxa uu insaanku aaminsan yahay in uu qaban karo isla markaa qiimo ay u leedahay fulinteedu. Marka uu doonayo insaanku in uu ka gudbo marxalad adag ama uu soo kordhiyo wax cusub waxa uu dadka kala kulmaa niyad jab iyo gaadhi maysid/awood uma lihid. Haddaba qofka ehel u ah doonitaan xadiid ahi kama fikiro culayska waxa uu doonayo laakiin waxa uu ka fikiraa siyaabaha uu ku gaadhi karo yoolkiisa, isla markaa waxa uu dejiyaa talaabooyin kala dambeeya oo fududeeya hanashadeeda.

Doonitaanku waa awood xoog weyn oo ku riixda qofka in uu kaga dhabeeyo waxyaabo uu raali ka yahay isla markaa uu ku

gaadhi karo awoodihiisa qofnimo,sidaa darteed tilmaantan in aynu ku barbaarino ubadka waa lagama maarmaan.

2.7.Qabyaalad/Nacayb

Erayadani waa kuwo halis ah oo ay haboon tahay in gebi ahaanba laga fogeeyo maskaxda ilmahaee kobcaysa. Haddii uu ilmuhu ka badbaado xanuunadan, waxa uu noqon karaa halyey xusuus mudan, keliyaa aan naftiisa aan anficin iyo dadkiisa ee caalamka oo dhan saameyn weyn ku yeesha.

Erayadanu waa jeel hakiya awoodaha dahsoon iyo waxqabadka uu qaban karo qofku ,waayo waxa ay hoos udhigaan sharafta uu insaanku leeyahay. Lama diidana in uu qofku wax taro oo uu garab u noqdo qaraabadii , laakiin waxa dib u dhac ah in dadyowga kale waxba u ogolaan waayo oo uu nacayb u hayo intii reerkooda kasoo hadha! Isla markaa ubadkiisana ku barbaariyo.

Maxaa uu u nacayaa?! ma in aanay isaga xigto u ahayn?! Mise in ay dhulka kula noolyihiin makhluuq oo dhami ku nool yahay? Maxaaa uu kaga wanaagsan yahay?
Run ahaantii, arintan waa mid u baahan fiiro gaar ah, sidee ayaa ay waalidku uga ilaalin karaan ubadkooda, haddii ay iyaga ka buuxdo oo ay dhiigga raacday?!

Waa in aynu iska dawayno marka hore, isla markaa aynaan ku ababin ubadka, wixii su'aal ah ee ay inaga weydiiyaanna aynu ugu jawaabno in dadku dhammaantood mid yihiin isla markaa arintanu ay tahay mid la degaalanta hore u socodka.

Ogsoonow nacaybku xal uma aha kala duwanaanta aragtiyaha iyo nasabka, laakiin waxa xal lagu gaadhaa iyo wada

noolaansho is afgarad, isu hurid, wax isu ogolaansho iyo xaqiiqda oo la raadiyo.

2.8.Dood midho dhal leh

Qeexid: wada hadal iyo isweydiin dhex mara dad ,si degen oo ixtiraam leh na usocda, iyaga oo aan u hiilineyn aragti cayiman ama cunsuriyad. Doodu waa baahi ka mid ah baahiyaha aasaasiga ah, oo ay dadku ku xidhiidhaan isla markaa fikrado isku weydaarsadaan.

Dooda waxa lagu ogaadaa runta, oo qofkasta oo ku jira dooddu waxa uu sheegaa wax ka qarsoomay ka kale, waxa lagula xidhiidhaa deegaanka inagu xeeran oo lagu dhex galaa, isla markaa waxa lagu ogaadaa aragtiyaha kala duwan.

Farqi baa u dhexeeya doodda iyo muranka, haddii loo jeedo in lagu ogaado runta waa dood midho dhal leh, laakiin haddii la dedayo xaqiiqda waa muran aan faa'iido lahayn.

Meeqaamka doodda:

- Waxa lagu xaliyaa dhibaatooyin.
- Waxa lagu xoojiyaa tilmaamaha wanaagsan iyo hab-dhaqanka.
- Waxa lagu dhisaa ilbaxnimo iyo qaran qurxoon.

Ujeedooyinka doodda:

Ujeedooyinka asalka ahi waa in lagu oogo xujada, oo la kala saaro waxyaabaha isku eeg, la reebo hadallada aan toosnayn. Waxa kale oo ka mid ah:

- In lagu ogaado aragtiyaha kala duwan ee shay cayiman laga qabo.
- In la helo natiijada ugu fiican si loogu adeegsado doodo kale.

- In lagu gaadho xal dhex-dhexaad ah oo raali geliya dadka oo dhan.
- In lagu qanciyo qofka lala doodayo in uu la yimaado daliilo sax ah oo sugan.
- Lagu saxo oo lagu qiimeeyo fikradaha qaldan.

Usluubka dooda:

- Hadal toosan oo aan xanaf lahayn isla markaa ay ka maqan tahay carinta iyo dheel-dheelku.
- In la ilaaliyo oo loo feejignaado wakhtiga loo ogol yahay qof walba.
- In goobta lagu doodayo ay joogaan oo qudha cidda ka qeyb galeysaa haddii ay tahay mid gaar ah.
- Dhageysiga wanaagsan iyo inaan lagu jarin hadalka qofka hadlaya.
- In la qadariyo qofka lala doodayo.
- Daacadnimo.

Noocyada doodda

- Dood diini ah.
- Dood wadan.
- Dood siyaasadeed.
- Dood bulsho.
- Dood dhaqaale.
- Dood tarbiyadeed (waxa soo qaban qaabiya xarumaha tarbiyadda, waxa ka qeyb gala dadka fikira ee wax baadha waxa lagu helaa xog tarbiyadeed).
- Dood amni.
- Dood ciyaareed.
- Dood iskeed u timaadda (malaha qodob cayiman).

Sida oo kale waxa dooda loo kala saaraa 4 weji marka loo eego tirada dad ah ee doodaysa, qodabka

laga doodayo, cida lala doodayo iyo natiijada ka soo baxaysa. Marka loo eego tirada waa 2 qof, 2 qof iyo qof kale oo u dhaxeeya, iyo wax ka badan . Qodabka laga doodayo waxa uu noqon karaa su'aal iyo jawaab wax lagu ogaanayo, tilmaan, sheeko iyo barasho. Cidda lala doodayo waa nafta, ama qof kula aragti ah /ku khilaafsan. Natiijada ka soo baxdaa waa laba mid uun isku raacid ama diidmo.

Haddaba, dooda iyo usluubkeedu waa in aynu fahamno isla markaa ugudbino ubadkeena si ay ugu noolaadaan nabad gelyo buuxda.

Doodda wanaagsan waxa ina baray Rabbi SWT oo Qur'aanka inagu baray oo ku xusay malaa'iigta oo uu u sheegay in uu dhulka u yeelayo cid dhaxasha, dabadeeto markii ay ka falceliyeen u sheegay in uu ogyahay cilmi aanay ogeyn. Ugu dambayn, doodu waa jid loo maro heshiis lagu badhaadho.

Tix: mawdoo3.com

2.9.Wakhti

Wakhtigu waa raasamaalka nolsoha, fursada aad haysato ee aad kaga faaidaysanayso waxqabadyo aad ku biiriso nolosha inta u dhaxeysa dhalashada iyo dhimashada. Waa noloshaada, waa qiimahaaga adiga. Marka uu qofku fahmo qiimaha wakhtiga, waxa uu kala macaan yahay malabka, sidaa darteed waa uu ku faro adaygaa, isla markaa waxa uu ku maalgashadaa falal uu mahadiyo.

Sida aynu wada ogsoonahay dunida waxa ku nool dadyow fikira oo soo saara adeegyo iyo barnaamijyo ay ku ganacsadaan, hadaba inaga waxa ay inaga qaataan wakhtigeena, waxa ay hoos u dhigaan awoodeena fikir iyo wax

soo saar, dabadeeto waxa aynu noqonayaa kuwo dhaqan ka dhigta fadhi ku dirir iyo caajis.

Waalid walba waxa ku waajib ah in uu maamulo wakhtiga ilmihiisa inta lagu gudo jiro marxaladaha nolosha ee kala duwan, uu ka xakameeyo wax walba oo luminaya isla markaa uu la qabsanayo oo aanu ka maarmayn.

Muhiim ma aha in lala mid noqdo bulshada oo hanaanka noloshoodu la mid noqdo ka ay raacaan dadyowga kale, laakiin waa inaad ubadka udejiso nidaam ay ku badbaadaan oo ay wax ku qabsadaan. Waxyaabo la daawado oo indhaha tira, maskaxda dhaawaca waxa hubaashii uga fiican in lagu tababaro waxqabadyo anfaca iyo barasho hagta.

2.10. Mid walba waxa loo sahlay wixii loo abuuray

Waa lagama maarmaan in aynu xadiiskan si qoto dheer ufahamno “mid walba waxa loo sahlay wixii loo abuuray”. Maxaa yeelay waa jiheeye inoo sahlaya in aynu raadino wixii la inoo abuuray oo macneheedu yahay waxqabadka inagu munaasibka ah ee aynu kusoo baxeyno, ama waxa kale oo laga fahmi karaa in mid walba wixii loo abuuray lagu hanuuniyay. Waa ay dhici kartaa in uu ka baadi yoobo marar badan . Ubadkaaga waa in aad xadiiskan barto kolka uu caqligoodu diyaar u yahay ee ay bilaabi karaan waxqabadyo anfaca isla markaa ay dooranayaan jidka ay mari lahaayeen.
Xadiiskan waxa kale oo aynu ka faa’iideysanaynaa in aynu ku qanacno waxyaabaha inoo gaarka ah, isla markaa ka gaabsano dadyowga kale iyo wax qabadkooda oo aynaan ka hanqal taagin waxyaabaha inoo sahlan.

2.11. Asxaab

“Saaxiibkaa waa safarkaa ama waa sahaydaa”.

Waa odhaah caan ah oo tilmaamaysa raadka uu saaxiibku ku leeyahay nolosha ibnu aadan ka oo hadba sidii uu yahay xidhiidhkaasu ayaa saameyn weyn ku yeelan kara nolosha.

Sida ay khubaradu sheegeen, laguma xukumo in uu yahay qof aynu garaneynaa saaxiibkeen ilaa aynu ka aragno mawqifyo caddeynayaa in uu yahay saaxiib dhab ah, tani waa xeerka guud ee lagula dhaqmo xidhiidhkan.

Ha moodin qof walba oo aad u aragto saaxiib in uu sidaa yahay, waxa dhici karta in uu jecel yahay tilmaamahaaga sidaa darteed uu kuugu soo dhawaado si uu kaaga fahmo isla markaa uu noloshiisa ugu dhaqan geliyo. Dhoollo cadeyn kasta ha moodin mid qalbi wanaagsani soo fasaxay, laakiin ogow inay jiraan kuwo qosla iyaga oo aan qosolkooda raali ka ahayn.

Saaxiibka dhabta ahi waaka ku garab taagan ee ku tilmaama marka aad gafto, marka aad saxantahay dadka oo dhami waa ay ku garab taagan yihiin. Saaxiibka dhabta ahi waaka aad agtaada ka hesho marka aad cidlo dareemayso ee waayo aduun kugu habsadaan.

Ha isku dayin in aad dhex gasho xidhiidhka ka dhexeeya ubadkaaga iyo asxaabtooda, laakiin waa inaad barto faa'iidooyinka guud ee saaxiibtinimada iyo tusaaleyaasha khibradaha la xaqiijiyay.

2.12. Hanti xor ah

Marxaladaha dambe ee barbaarinta waxa aad fahamsiin kartaa ubadkaaga qiimaha hantida xorta ah ee uu qofku gaar ahaan u leeyahay.waxa kale oo aad bari kartaa nidaamyada ganacsi dhaqaale, iyo shaqo abuur macquul ah. Tani waxa ay aragti ka siinaysaa caalamka ganacsiga iyo wax soo saarka.

Waxa kale oo uu xisaabtiisa ku darsanayaa inuu ku biiro dunida isaga oo isku filan oo leh xoriyad hantiyeed.

Waxa kale oo looga warami karaa maal qabeenada aduunka oo iyaga oo yar-yar la yimi fikrado gebi ahaanba bedelay wajiga dhulka oo iyaguna ka dhaxlay hanti ay ku noolaadaan.

Xogtaa kor kuxusan iyo kuwo la mid ahiba waxa ay kor uqaadaan hab-fikirka ubadka.

2.13. Hoggaamin

Hordhac:

Insaanku waxa uu ku nool yahay caalam ay ka jirto dhibaato badan oo hor istaagta dariiqa horumarka iyo guusha. Sidaaa darteed qofna ma awoodo in uu hore usocdo isaga oo aan lahayn awood uu kaga gudbo caqabadahaas.

Caalamku umasoo joogsado qof jilicsan laakiin waxa mudnaanta lasiiyaa kuwo go'aan iyo feejignaan leh. Waxa ku waajib ah qofka in uu kobciyo xirfadihiisa oo uu wakhti siiyo naftiisa isla markaa uu kasbado tilmaamaha ka yeelaya hoggaan haga dunida.

Waa kuma hoggaamiye?

Qeexid:

Waa qof hal abuur leh oo la yimaada habab cusub, si uu uwanaajiyo hawsha uu gudanayo ugana yeelo natiijada ta ugu fiican. Hoggaamiyaha guulaystaa waa ka ay soo muuqdaan xirfadihiisu marka uu dejinayo tallaabooyinka, iyo habka loo fulinayo. Waxa kale oo uu ku tilmaaman yahay in uu dhiiri geliyo dadka uu la shaqeeyo.

Tilmaamah hoggaamiyaha

Waa tilmaamaha ay ku qeeexaan culimada **Islaamka** iyo kuwa kaleba:

- Raaca wixii Alle SWT faray kana hadha wixii laga reebay.
- Ka cabsada Rabbi SWT oo dareensan in uu arkaayo.
- Hawlkar, karti leh, ra'yi toosan.
- Amaano leh.
- Sabir iyo adkaysi leh.
- Wax u fiirsada oo nidaam ku socda.
- Saamayn ku leh dadka kale.
- Dhacdo abuura, go'aan sax ahna qaata.
- Awood u leh in uu arko waxyaaabaha ka qarsoon dadka kale.
- Dhiiri geliya kooxdiisa.
- Qorsheeya hawlaha sida loo fulinaayo.
- Bulsho dhexgal leh.
- Aqoon badan leh.
- Leh maskax uu ku xaliyo mushkiladaha.
- Dhowra usluubta wanaagsan.
- Fuliya oo an hakin qorshihiisa.

Haddaba si aad ugu barbaariso ubadkaaga tilmaamaha hogaamiyaha waa in aad barto qodobadan ay sheegeen khubaradu:

- Ku beer kalsooni, abaal mari marka uu wax fiican la yimaado, isla markaa ha liidin marka uu gafo ee si dabacsan ugu sheeg oo tilmaan.
- Haku kalifin in uu qabto hawlo ka awood badan oo Haddii uu fulin waayo uu ka dhaxlayo kalsooni darro.
- Bar sida wax loo qorsheeyo, geesinamada, masuuliyadda iyo horaysiinta arimaha muhiimka ah.
- Sii kal-gacal badan.
- Kala qayb qaado farxadda guulihiisa.
- Haka jarin qosolkiisa.

- ❖ Ku dhiiri geli in uu noqdo hormuud.
- ❖ Ku beer xilkasnimo.
- ❖ Bar in uu wax bixiyo

Tix: mawdoo3.com _ القيادة

Yusuf

CUTUBKA 3AAD
DUNI BAA AAD REJO U TAHAY!

3.1.Hordhac:

Qododbka ugu muhiimsan ee uu qofku ku noqdo masuul, xil isa saara oo anfaca dalkiisa, dadkiisa iyo diintiisaba waa in uu aamino in ay dad badan iyo duniduba ay ku xisaabtamaan oo ay rejo ku qabaan, maadaama oo uu yahay qof ka tirsan oo la rabo in uu ka dhigo dunida ta ugu wanaagsan.

Dadku waxa ay u maleeyaan in awooda Ilaahay SWT ay inoo filineyso wax kasta oo aynu u baahano, laakiin waa ay hilmaameen in camiridda dhulka loogu talo galay in ay ka soo baxdo awoodaha iinsaanka loogu nimceeyay.
Taa micneheedu waxa weeye, umad walba waxa u qabsoomay oo ay ugu biiraysaa tartanka ilbaxnimada hadba wax qabadka ay la timaado.
Inaga oo taa ka duulayna waa in aynu ubadka ku barbaarino aragtiyo toosan oo dareensiiya meeqaamkiisa iyo waajibka laga sugayo.
Dadyowga kala duwan ee rejo ka qaba isla markaa saameeya, isna uu saameeyo ayaa aynu hoos ku lafo guri doonnaa.
Waxa kale oo aynu tilmaami doonaa kaalinta uu ugu jiro wadanka iyo dunida guud ahaan.

3.2.Guriga:

Ubadka waa in lagu barbaariyo garashadan:

- **Hooyo**

Hooyadu uma baahna in la qeexo ama qiimaheeda la tilmaamo oo waa aynu wada ogsoonahay.
Hooyadu waa qofka keli ah ee nafteeda kuu hurta, ee aan kaa daalin ,kaa caajisin.
Sidaa darteed waxa aad tahay geed ay beeratay oo ay jeceshahay mar walba in ay aragto isaga oo qurux badan, la hadhsado oo midho leh. “Ha hungeyn Hooyadaa”.

- **Aabo:**

Aabe waa tiirka nolosha iyo sababta jiritaankaaga.
Waxa uu mar walba u ordayaa in uu ka soo baxo mas’uuliyadda uu qaaday oo ah jiritaankaaga.
Waxa aad tahay qofka halgankiisa sii wadaya sidaa darteed, “ha hungeyn, wehel iyo garab u noqo”.

- **Walaalo:**

Walaalku waa garabkaaga iyo cudud ku adkaysa, sidaa darteed waa in aaad ka kaa weyn ixtiraamto, ka kaa yarna u

naxariisato, isla markaa xidhiidh wanaagsan la yeelato si aad ugu noolaataan jawi iskaashi oo midho dhal leh.
Mar walba waxa aad ahaataa mid khibrada uu nolosha ka helay u gudbiya walaalkii si ay wadadu ugu fududaato.

- **Ehel:**

Waajibka inaga saaran ehelku waa in aynu xidhiidhino oo aynu ka war hayno xaaladahooda si aynu u kaalmayno.
Waxa ay inaga mudan yihiin u dhibrin iyo qadarin.

- **Shaqaale:**

Dadyow fara badani, ma laha garashada ah in shaqaaluhu ay yihiin dad inla mid ah, sidaa darteed waa in aaad mar walba niyada ku heyso baahida noloshu in ay keentey goobaha ay ka shaqeynayaan oo aynu u naxariisano oo qadarino.

3.3.Jaar:

Marka aad ka baxdo guriga waxa aad la kulantaa dadka aad jaarka tihiin oo iskaashi idinka dhaxeeyo wehelna aad isku tihiin, sidaa darteed waa in aad kooda weyn qadariso, ka yar u dabac sanaato, isla markaa waxa aad awoodo ugu kaalmayso.

3.4.Dugsi:

Dugsigu waa hoyga aqoonta ee aad ku qaadaneyso noloshaada inta ugu qurux badan.
Waxa aad kula kulantaa:

- **Maamul:**

Si aad u hesho qadarinta maamulka waa in aad ka soo baxdo waajibkaaga tacliinta, ixtiraamto barayaasha, isla markaa si wanaagsan uga qeybqaadato fasalkaaga oo aad caawiso soo dhaweyso asxaabtaada.

- **Barayaal:**

Si aad u hesho qadarinta baraha waa in aad raacdo talooyinkiisa isla markaa aad u feejignaato sharaxiisa.

- **Ardey:**

Jawiga ardeynimo ee aad la wadaagayso asxaabtaada waa in uu noqdo iskaashi, walaalnimo, iskaalmeyn iyo baashirid.

- **Shaqaale:**

Ha kala bakheylin salaan, haku odhan erey dhaawaca.

1.1.Dalka Hooyo

Dalka hooyo waxa ku nool dad tiro badan oo meeqaamkooda leh oo tiir u ah jiritaanka dalka, sidaa darteed, waa in aynu ogsoonahay waajibka inaga saaran.

- **Madax:**

In la caayo waxa ka haboon in baahida iyo cabashada loogu gudbiyo usluub wanaagsan oo kuu soo jeediya quluubtooda.

- **Culimo:**

Qof waliba waxa uu aqoonyahan ku yahay wixii uu barto, sidaa darteed waa in aad wixii madaw kaa galo weydiiso si aad uga jahli baxdo.

Culimada diintu waxa ay inaga mudan yihiin qadarin, ixtiraam iyo in aynu ka faa'iideysano aqoontooda.

Waxa ay hayaan jawaabaha su'aalo faro badan oo aynu la kulano nolol maalmeed ka.

3.5.Guud ahaan Dadka:

"Naga mid ma aha ka aan qadarin kaayaga weyn ee aan u naxariisan kaayaga yar" xadiis sharaf leh.

'Qof weyn waxba looma sheego ee waxbaa la weydiiyaa' Odhaah_, dabeeto waxa aad rabto in aad sheegto waxa lagu dhex daraa hadalka dambe ee aad aragtidaada kaga hadlayso.

'Ha iloobin in aad ubadka soo barbaaraya wax ka barato' Odhaah.

Xikmadahaas iyo kuwo la mid ah waa in aad barto ubadkaaga.

- **Adeegayaal:**

Meel kasta oo aad joogto waa in aad adeegayaasha bulsho si fiican ula dhaqanto, xitaa hadii aanay kugula dhaqmin, oo aad naxariis iyo qadarin u muujiso.

- **Masaakiin:**

Waa lagama maarmaan in ubadka lagu barbaariyo naxariista iyo dareenka dhibaatada haysata dad badan oo aan haysan hoy ay ku gam'aan, cunto ay quutaan, daryeel iyo farxad nololeed iyo sidii ay ugu kaalmayn lahaayeen.

3.6.Dunida oo idil

Waa lagama maarmaan in wakhti cayiman marka ay gaadhaan ubadku ay aqoon u yeeshaan taariikhda caalamka oo ay fahan guud ka qaataan, isla markaa ay ogaadaan qadiyadaha la jaanqaadaya wakhti xaadirka, dadyowga dulman ee ku kala nool dunida daafaheeda.

Waxa kale oo aad uga warami kartaa, maadama uu yahay qof nool oo jira in uu saameyn ku leeyahay dunida, maxaa yeelay waxa la sheegay in dhaqdhaqaaqa baalasha balanbaalsita ee joogta cidhifka dunidu cidhifka kale ay ku noqon karto duufaan weyn.

Taa micnaheedu waxa weeye waxa uu noqon karaa halyay nabad iyo khayr lagu xasuusto.


















Dr. Littles




HWEEDY Studios


Yousef


PressFoto 104489975


Webteb








M7ET.COM








Yousef
















Yousef


Yousef


Yousef


Yousef


Yousef


Yousef


Yousef


Yousef